Caddad gaar ah oo ku aaddan Waxbarashada iyo Dhallinyarada

Carruurteenna "our children"

Warsidaha UNICEF Somalia Agoosto 2009

Culays kastaba ha jiree: Waxbarasho ayaa ay helayaan carruurta iyo dhallinyarada

Waxaa qorey Rozanne Chorlton
Wakiilka UNICEF, Somalia

Qaar badan oo innaga mid ah ayaa laga yaabaa in ay xusuustaan wixii aan ilmanimadeenna dareemi jirney marka fasaxa dheer ee dugsiyadu soo gabogaboobayo: kaas oo qayb ahaan ahaa murugo ku aaddan wakhtigii firaaqada ee dhammaadey oo qayb ahaanna ahaa farxad ku aaddan waxa aan ka fileyno sanad-dugsiyeedka cusub. Haseyeeshee, carruurta oo dhan nasiibkaas ma wada lahan. Iyada oo sanad-dugsiyeedka cusub uu ka bilaabanayo Soomaaliya, ayaa keliya saddex ka mid ah 10kii carruur ahiba ay helayaan xaqa ay u leeyihiin waxbarasho aasaasi ah oo tayo leh.

Iyada oo ay deegaannadu kala duwan yihiin oo ay isugu jiraan kuwo ka soo kabanaya xaalad degdeg ah ilaa mid iskahorimaad iyo barokac ka jiro, ayaa gaaritaanka dugsiyada ee Soomaaliya ay weli xaddidan tahay. Gaarid la'aantu ma sababin oo keliya maqnaanshaha dhismayaasha dugsiyada ee waxa ay sidoo kale ka dhalatey waalidiinta oo aan awoodi karin in ay bixiyaan ujuurada dugsiga, dharka dugsiga, mushaarka macallimiinta iyo qalabka/agabka dugsiyada. Caqabadahan bulsho-dhaqaale ayaa si gaar ah u takooraya gabadhaha bulshada Soomaaliyeed halkaas oo kaalimaha dheddig-laboodka iyo caadooyinka dhaqan ay ka soo horjeedaan in ay si iskumid ah uga qaybqaataan nidaamka waxbarashada. Goobaha ay dugsiyadu

Gabdhaha la midka ah gabadhan oo joogta Gaalkacyo waxa ay ka faa'iideysteen taageerada UNICEF ee Waaxda Waxbarashada. © UNICEF Somalia/2008//Maulid.

ka jiraan, ayaa maamulka Waxbarashadu uu la kacaa-kufayaa bixinta mushaarka macalimiin tiradoodu ay marka horeba koobneyd sidaa daraaddeedna culasyka waxbarashada waxa uu ku dhacayaa bulshooyinka. Iyada oo si hoose ula shaqeyneysa la-hawlglayaal heer bulsho ah iyo iyada oo ay iskaashanayaan maamulka Waxbarashada, ayaa UNICEF ay isku dayeysaa in ay wax ka qabato qaar ka mid ah caqabadahaan si markaa sanad kasta arday hor leh ay u helaan xuquuqdooda waxbarasho. Qaar ka mid ah sheekooyinka dhabta ah ee ku qoran cadadkan warsidahan, ayaa akhrista-yaasha u bidhaaminaya hababka hal-abuurku ku dheehan yahay ee UNICEF ay isugu dayeyso in ay ku fuliso waajibkeeda ay ku hubineyso in waxbarasho aasaasi ah oo tayo leh lagu bixiyo deegaan inta badan ah mid aad u halis badan.

Arrintan ayaa waxaa suurtageliyey taageerada muddada fog ee laga helayo deeq-bixiyeyaasha ay ka midka yihiin UK-DfID, Holland, USAID, Midowga Yurub, iyo kuwa deeqaha siiya qaybta ay UNICEF Caalami ahaan ay muhiimmadda u siiso ee Waxbarashada Aasaasiga ah iyo Sinnaanta Jinsiga (Dheddig-laboodka), oo uu ku jiro dallka Norway. Waxqabadka UNICEF ee waxbarashada waxaa sidoo kale taageerey *Qatar Charity*,

Eeg Bogga 7aad

UNICEF oo wax ka qabaneysa baahiyaha waxbarasho ee carruurta ku nool waddada Afgooye

Waddada Afgooye, qayb uu dhererkeedu yahay 15 km oo ka bilaabata duleedka Muqdisho, ayaa ay ku nool yihiin in ka badan 524,000 oo dad gudaha ku barokacay ah oo ay dagaallada aan joogsan ee labadii sano ee la soo dhaafey ay ku khasbeen in ay ka soo cararaan guryahooda.

Dadka Barokacay waxa ay u badan yihiin carruur iyo haween aad ayaana ay u silceen. Helidda adeegyada aasaasiga ah ayaa kooban. Tobannaan kun oo ah carruur ku jirta da'dii dugsiyada ayaa aan helin xuquuqdooda waxbarasho. Qoysas badan ayaa waxa ay badbaado u soo doonteen xerooyinka liita ee qashinka iyo wasakhda badan.

CADDADKAAN KA AKHRISO

Tababar wax-hogaamineed oo waxtarey gabdho	2
Dadaal warbaahineed oo waxtarey saxaafadda	3
Hoggaamiyeyaal dhallinyaro ah oo heley fursad labaad	3
Wiil Soomaaliyeed oo kaalinta koowaad ka galey tartan farshaxan	4
Culayska tababarka macallimiinta	5
Naadiyada carruurta oo iftiimiyey arrimaha bulshada	5
Dugsiyada Qur'aanka oo dadka u soo dhoweeyey waxbarashadii	6
Nagala soo xiriir	7

Iyada oo qayb ka ah ballanqaadka UNICEF ee carruurta ku nool xaaladaha degdegga ah, ee la halmaala ilaalinta iyo bixinta deegaan bedqaba, ayaa barnaamijka waxbarashada degdegga ah uu guulo ka soo hooyey waddada Afgooye.

Waxqabadyada UNICEF iyo NGO-ga la-hawlgala ee waddada Afgooye ayaa dib u soo nooleeyey fursadihii waxbarashada ee in ka badan 33,000 oo carruur ku jirta da'dii dugsiyada ah kuwaas oo 49% ay yihiin gabdho. Dib u bilaabidda waxbarashada waqti ay jiraan dhibaatooyin, aad u saameeya carruurta ku jirta da'dii dugsiyada, gacan kama geysaneyso oo keliya in dib-loo-abuuro jawi la dareemayo xaalad caadi ah ee laakiin waxa ay sidoo kale bixisaa fursad lagu caafimaado iyada oo loo marayo bixinta daryeelka maskax-bulsho.

Eeg Bogga 2aad

Waxbarashadii aasaasiga ahayd ayaa Afgooye loogu soo nooleeyey 33,000 oo carrruur ah

Ku taageera dhallinyarada in ay horumariyaan bulshada, ayaa ay tiri ka-qaybgale tababar wax hoggaamineed

‘Gabdhaha da’deyda ah oo lagu taageero in ay noloshooda hagaajiyan ayaa ka mid ah yoolalka aan higsanayo, ayaa ay tiri Faadumo C/qaadir, oo reer Boosaaso, Waqooyi-bari Soomaaliya (Puntland) ah, iyada oo ka sheekeyneysa sida ay qayb uga noqotey Dadaalka Wax-hoggaaminta iyo Kobcinta Gabdhaha (GLDI), oo ah dadaal ay UNICEF hoggaamineyso oo u awood-siinaya gabdhaha in ay ka munaaqashoodaan arrimo badan oo kuwa bulshada ah oo saameeya iyaga.

Faaduma © UNICEF Somalia/2009

Faaduma waxa ay markii ugu horreysey ay dhammaadkii sanadkii 2007da ay arrintan ka maqashey ardayad ay fasal yihiin mac’had xirfadeed oo ku yaalla Boosaaso. Ardayaddaas saaxiibaddeeda ahayd ayaa uga sheekeysey kulammada la magac baxay Dhawaaqa-gabdhaha waxaana ay wax ka weydiisey sida ay uga qayb qaadan karto dadaalkaa. Maaddaama ay jecleyd in ay ogaato waxa ka dhaca kulannada dhawaaqa gabdhaha, waxa ay ka qayb gashey kulan ay ku ogaatey in uu aad u faa’iido badan yahay. “Weligey ma arkin gabdho sidaas u hanweyn,” ayaa ay tiri iyada oo intaa raacisey in geeddi-socodkan uu nooleeyey xiisaha ay u hayso in ay ku deeqdo waqtigeeda si ay wax u tarto gabdho kale.

Iyada oo ah qof xiiso u hayo in uu wax ka taro dhalinta isbeddel wanaagsan, Faaduma waxa ay sheegtey in ay dadaalkan wax-hoggaaminta uu yahay halka ugu habboon ee lagu ilaalin karo gabdhaha yaryar. “Fikraddu waa wax aan dhab ahaantii u baahannahay. In kasta oo ay gobolka ka jiraan dadaallo ku wajahan dhallinyarada, haddana fikradda GLDI waa mid wax la mid ah jirin waxaana ay bixisaa xirfado tiro badan – xirfadaha nolosha, xirfadaha wax-hoggaaminta, xirfadaha ka qaybgalka, xirfadaha dheddig-laboodka & u qareemeynta, macluumaad ku wajahan gabdhaha dhallinyarada ah. GLDI, nalaguma barin oo keliya sida aan isu caawin karno gabdho ahaan laakiin waxaa nalagu barey oo kale sida aan hoggaamiyeyaal u noqon karno,” ayaa ay tiri.

Faaduma hadda waa macallimad iskaa wax u qabso ugu shaqeysa dugsi ay maamulaan dhalinyaro iskaa-wax u qabsadayaal ah waxaana ay gabdhaha deriskeeda ah ku gargaartaa xirfadihii ay ka heshey dadaalka GLDI.

“Ka gabar dhallinyaro ah ahaan waa in aan wax taraa bulshadeyda anniga oo bixinaya wixii aan karo.

Hore, waxa aan diiradda u saari jirey nolosheyda ardaydnimada waxaana aan waqtigeyga u qeybin jirey buug-akhris, iyo anniga oo u dhexeeya guriga iyo dugsiga, haseyeeshee, hadda waxa aan ahay ardayad iyo hoggaamiye. Waxa aan ku biirey kooxda dhalinyarada ah ee *Somali Students Connecting Organization (SSCO)* oo ah urur dhallinyaro oo wax-barashada ku wajahan oo ka jira degaankeenna halkaas oo aan gargaaro oo aan u naseexeeyo gabdhaha.” Waxa ay qirtey in ay jiraan culaysyo ay tahay in la wajaho: “gabdhaha dhalinta yar ee Soomaaliya oo dhan, waxaa haysta culaysyo bulsho-dhaqaale – saboolnimo, dowlad dhexe oo aan jirin, jawi gabdhaha u roon oo aan jirin iyo fikrad khaldan oo dhaqan ahaan laga aaminsan yahay gabdhaha. Kuwani waa culaysyada ugu waaweyn ee caqabadda ku ah horumarka gabdhaha dalka.

“Haddii aanan waxbaranin, ama awood-helin, markaa annaga (gabadhaha) waxa aan noqoneynaa kuwo nugul. Waana taas tan aan rabno in aan la dagaallano. Iyada oo hadalkeeda sii wadata waxa ay sheegtey in guud ahaan, ay kalsooni ku qabto karti da’yarta. “Da’ yartu waxa ay leeyihiin karti ballaaran iyo waxaana ay tahay in ay wanaagsan tahay in maalgelin lagu sameeyo dhalinta Soomaaliyeed maaddaama dhalinyaradu yihiin kuwo uu hal-abuurkoodu aad u wanaagsan yahay. “Si ay u gaaraan awood-dooda, dhallinyarada Soomaaliyeed waxa ay u baahan yihiin in ay taageero ka helaan dadweynaha, ururada iyo in ay helaan fursado ay ku kobciyaan hibooyinka ay leeyihiin.”

Faadumo waxa ay jeclaan lahayd in madaxda siyaasadda ee Soomaaliya ay fahmi lahaayeen muhiimadda ay leedahay maalgelinta da’yarta maaddaama ay yihiin hoggaamiyeyaashii berrito. “Waxa aan jeclaan lahaa in ay aqoonsan lahaayeen kartideenna, iyo hal-abuurka aan la imaaneyno. Waxa aan nahay kuwo firfircoon oo maskax leh, waxaana aan mudannahay in nala maalgeliyo.”

Farriin ayaa ay u haysaa hoggaamiyeyaasha Soomaaliyeed: “Fadlan joojiya dagaallada macno-darrada ah, dhiga hubkiina oo isug imaada miiska wadahadalka si khilaafaadka loogu xalliyo si nabad ah. Taas ayaa ah sida keliya ee aad ku gaari kartaan yoolalkiina, aad ku bad-baadin kartaan bulshadeenna oo aad mustaqbeella uga dhigi kartaan baraare. Taas ayaana ah sida ugu wanaagsan ee ay idinku xusuusan karaan jiilalka mustaqbalka.”

UNICEF oo wax ka qabatey baahiyaha degdegga ah ee Carruurta Afgooye - *Ka yimid bogga 1aad*

Daryeelkan iyo taageeradan, ayaa carruurtu ay si fudud oo buuxda uga soo kaban karaan qaracankii iyo dhibaatooyinkii ay la kulmeen intii ay socdeen dagaallada iyo barokaca.

Xoogga waxqabadka waxbarashada degdegga ah ee laga fuliyey waddada Afgooye waxaa ka mid ah 151 fasallo ku-meel-gaar ah (laga dhisey qalabka dhismaha ee deegaanka) iyo kuwo teendhooyin ah, 248 macallin oo la siiyo lacag dhiirigelin ah, tabobar macallimiin oo habka wax-dhigista ee ilmuhu uu xuddunta u yahay iyo daryeelka aasaasiga ah ee maskax-bulsho, tababaridda Guddiyada Waxbarshada Bulshada (CECs), iyo bixinta sahayda baridda iyo barashada iyo qalab madadaallo.

Bulshooyinka Gudaha ku Barokacay ee waddada Afgooye ayaa si weyn u soo dhoweeyey waxqabadka waxbarashada degdegga ah oo bixiyey deegaan aamin ah oo carruurta ilaaliya, kaas oo siinaya waqti ay ka nastaan xaaladda adag ee degsiimooyinkaas wasakhda badan.

Ruqiyo Maxamed Diiriye waa hooyo haysata saddex carruur ah oo dhigta dugsi xaaladaha degdegga ah oo ku yaalla degsiimada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Ceebdiid. Waxa ay sheegtey in ay ka mahadcelineyso adeegyada waxbarashada aasaasiga ah ee UNICEF at carruurteeda u soo marsiineyso la-hawlgalaheeda degaanka ee Somali Community Concern (SCC).***Eeg Bogga 4aad***

Dadaalka wax-hoggaaminta waxa uu gabdhaha siiyaa awood…

Dadaalka warbaahineed oo dhiirigeliyey xirfadaha saxaafadda

In ka badan 300 oo dhallinyaro ah ayaa si toos ay uga faa'iideystey Dadaalka Warbaahinta Dhallinyarada ee Soomaaliya, oo ah istiraatiijiyadda ay UNICEF Somalia ku dhiseyso xirfadaha warbaahinta macluumaadka ee dhallinyarada. Dadaalkan, ayaa kor loogu qaadey kartida da'yarta iyaga oo awood loo siiyey in ay soo saaraan barnaamijyo si gaar ah ugu habboon kooxaha ay isku-filka yihiin iyo nooca hadalka ay dhallinyaradu adeegsadaan.

Farxiya oo hawsheedii ka wadata istuudiyaha dhexdiisa.© UNICEF Somalia/2009

Dadaalkan, ayaa ay u mareen in laga doodo arrimaha saameeya sida HIV iyo AIDS, shaqo-la'aanta, jarjaridda saxaaxa dheddigga (gudniinka), helidda adeegyada iyo xuquuqaha carruurta. Dadaalku waxa uu ku wajahan yahay karti-dhiska, iyada oo loo marayo tiro tababarro is-dhexgal ah oo laga bixiyo saddexda nooc ee warbaahinta – Telefiishannada, Idaacadaha iyo Warbaahinta qoran.

Farxiya Siciid (sawirkan) ayaa ka mid ah dadka ka faa'iideystey Dadaalka Warbaahinta Dhallinyarada kaas oo awood u siiyey in ay ay kobciso xirfadaheeda saxaafadeed. Farxiya, oo 18 jir ah waxa ay hadda u shaqeysaa xarun idaacad FM ah oo ku taalla Puntland, 98.2, iyada oo wararka ka akhrisa soona saarta barnaamijka toddobaadlaha ah ee Haweenka. Waxa ay tiri, haddii aaney ahaan lahayn Dadaalka Warbaahinta Dhallinyarada in aaney maanta joogi lahayn istuudiyaha. "Isla markii aan dhammeystey tababarkii hordhaca ahaaba, waxaa na loo qaybiyey saddex kooxood oo mid kastiba ay ku xoogga saareysey mid ka mid ah noocyada warbaahinta – Raadiyaha, Telefiishanka iyo Saxaafadda Daabacan. Waxa aan ku biirey kooxdii raadiyaha, waana aan jecleystey," ayaa ay tiri.

Sida ay sheegtey Farxiya. Ujeeddada ugu weyn ee ay ugu biirtey dadaalkaas waxa ay ahayd in ay gacan siiso dhalinyrada bulshadeeda iyada oo kor u qaadeysa wacyiga ku aaddan arrimaha caadiga ah ee saameeya. Intaa waxaa dheer, dadaalka waxa uu ka caawiyey iyada iyo kaqaybgalayaasha kaleba in ay kobciyaan aqoon iyo xirfado awood u siiyey in ay meel ka helaan suuqa shaqada. "Dadaalka nama siinin oo keliya aqoon iyo xirfado laakiin waxa uu ina siiyey fursad aannu ku dhexgalno warbaahinta ku yaalla gobolkeenna isaga oo isku xirey kooxaha dhallinyarada iyo warbaahinta,"ayaa ay tiri Farxiya. Waana xiriirrada noocaas ah kan Farxiya iyo dhallinyaro kale oo la mid ah ay hadda uga shaqeynayaan tiro warbaahinta Puntland ah iyaga oo ka ah war-soo-direyaal, war akhriyeyaal iyo barnaamij soo saareyaaal.

"Dadaalka ayaan waxa aan ku helney in aan la shaqeyno warbaahinta waxaana ay ogaadeen xirfadaha iyo kartida aan leenahay," ayaa ay tiri. Farxiya waxa ay sheegtey in dhallinyaro kale oo dadaalkaas qayb ka ahaa oo bilaabey hawl ay gaar u leeyihiin, ay iyaguna noqdeen kuwo guuleystey oo noloshooda ku debera iyaga oo duuba kulannada bulshada sida aroosyada, shirarka iyo dabaaldegyada. "Annigu ma dhigan Jaamacad ama Mac'had; waxa aan dhammeeyey oo keliya dugsiga sare halkaan ayaana aan shaqo ka heley. Tani waxa ay tusineysaa sida Dadaalka YBI uu muhiim ugu yahay dhallinta; waxa uu siiyaa xirfado nolol-raadsi oo da'yarta ka gargaara in ay naftooda iyo qoyskooda waxtaraan maaddaama ay badidoodu helin fursad ay ku helaan waxbarasho toos ah," ayaa ay tiri. Markii la weydiiyey in ay joojisey taageeradii ay siineysey bulshadeeda markii ay ka baxdey barnaamijka YBI iyo hawlaha dhallinyarada, waxa ay ku jawaabtey "Shaqaale ayaan ahayn, laakiin waxa aan u taageeraa bulshadeyda si ka badan sidii markii aan ahaa iskaa wax u qabsade YBI. Mararka qaar, barnaamijyadeenna waxa ay sameeyaan doodo ay u qabtaan bulshada oo ku saabsan arrimaha xasaasiga ah oo haddii arrinta laga doodana waxa ay ka dhigan tahay in dhibaatada kalabar la xalliyey. Marka dhinacaas laga eego, weli wax baan taraa bulshada".

Dhallinyarada oo fursad labaad oo warbarasho ku heley Xarumaha Waxbarashada Dadban

Dhallinta iyo carruurta roonroon ee aan fursad u helin waxbarashada tooska ah ayaa rajo ka leh mustaqbal wanaagsan oo ay ku heleen barnaamij Waxbarashada Dadban ah oo fursad labaad u siiyey waxbarasho.

Mid ka mid ah macaahiddaas bixinaysa Waxbarashada Dadban waxaa ka mid ah Dr Ricardo Women and Youth Training Organization, oo ah NGO magaalada Baydhabo, Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya laga dhisey sanadkii 2003da si uu u kobciyo horumarka iyo awood-siinta haweenka iyo dhallinyarada isaga oo siinaya waxbarasho iyo tababar xirfadeed. Ururka waxaa loogu magac darey marxuumkii Dr. Marques Ricardo, ee lagu toogtey cusbitaalka Baydhabo sanadkii 1997 isaga oo hawshiisa wata.

UNICEF ayaa taageerta Xarunta Dr Ricardo iyaga oo siisa tababar maareyn iyo kan macallimiinta. Waxa ay siisey manhajka Waxbarashada Dadban, oo ay ku jiraan buugta akhriska, Tilmaame-Baraha iyo muqararka, iyo iyada oo xarunta siisa qalabka dugsiyada iyo kan xafiisyada. Taageeradan ayaa dhallinyaro badan iyo carruur ku jirta da'dii dugsiga oo aan helin fursad ay ku tagaan dugsiyada tooska ah ay dhigtaan fasallada xarunta. Hadda xarunta waxaa dhigta 446 dhalinyaro Waxbarashada Dadban qaata kuwaa oo 213 ay gabdho yihiin. Fasalka waxa ay ku qaataan akhris-qoraalka, xisaabta, cilmiga bulshada, caafimaadka iyo sayniska, waxbarashada ganacsiga, xirfadaha nolosha iyo tababaro xirfadeed. Ilaa iyo intii xarunta la furey ayaa 223 arday ka qalinjebiyeen markii ay dhammeysteen heerka 4aad ee barnaamijka Waxbarashada Dadban. Qaar ka mid ah ardaydii ka qalinjebisey waxa ay ku biireen dugsiyada tooska ah waxaana ay sii wateen waxbarashooda ilaa ay dhammeysteen fasalka 8aad. Xoogaa ka mid ah kuwii dhammeystey heerka 4aad ee Waxbarashada Dadban waxa ay ku biireen tababar-xirfadeedka laga bixiyo xarunta waxaana markii ay dhammeyseen ay furteen ganacsi ay gaar u leeyihiin ama shaqo ayaa ay heleen.

Cabdi Ibraahim Buulle oo 19 jir ah ayaa sanadkii 2003 ku biirey Xarunta Dr. Ricardo, dadaal weyn ka dib waxaa uu muddo labo sano ah ku dhammeystey heerarka kowaad ilaa kan afaraad. Ka dib waxa uu ku biirey barnaamijka tababar xirfadeedka kombuyutarka (Tikonolojiyadda Macluumaadka), isaga oo shahaado ka qaatey lix bilood ka dib. Hadda waxaa uu u shaqeeyaa Xarunta Telecom Somalia ee Baydhaba isaga oo farsamo yaqaan ka ah.

Cabdi waxa uu yiri, "Waan ka mahan-celinayaa kaalintii ay Dr Ricard iyo UNICEF ka qaateen fududeyntii waxbarashadeyda aasaasiga ah iyo tababar xirfadeedka ay muddo aad u gaaban igu siiyeen lacag la'aanta. Waxa aan ku boorrinayaa dhammaan dhallinyarada iyo carruurta aan helin waxbarashada aasaasiga ah in ay ku biiraan barnaamijyada Waxbarashada Dadban."

Dadaalka Warbaahinta Dhallinyarada waxa uu isku xirey dhallinyarada iyo sharikadaha warbaahinta…

Wiil Soomaaliyeed oo kaalinta koowaad ka galey tartan farshaxan

Cabdikariin Maxamed Xuseen, oo jooga magaalada Jowhar ee Bartamaha Soomaaliya ee ay iskahorimaadyadu burburiyeen, ayaa ku guuleystey tartan farshaxan oo caalami ah.

Sawirkii uu Cabdikariin kaga qaybgaley, oo muujinayey himiladiisa dhinaca Sinnaanta Dheddig-laboodka ee Soomaaliya ayaa muujinaya nin iyo haweeney dhakhaatiir ah oo daryeelaya qof bukaan ah. Waxaa loo aqoonsaday in uu tartanka ku guuleysteen sawirkiisa iyo saddex kale oo ka kala yimid kenya, Togo iyo Benin oo dhammaantood ah dalal Afrikaan ah. “Marna ma fileynin in aan niyadjab la soo kulmi doono waayo aad baan ugu fiicanahay sawirka – waana hiwaayaddeyda,” Cabdikariin ayaa si kalsooni leh u yiri hadalkaa markii uu warku soo gaarey.

Cabdikariin waxa uu dhigtaa Dugsiga Aasaasiga ah ee Kulmis ee ku yaalla magaalada Jowhar isaga oo ku jira Fasalka 5aad. Isaga oo ay macallimiintiisu ku tilmaameen in uu yahay mid ka mid ah ardayda ugu maskax wanaagsan dugsiga, Cabdikariin waxa uu labadii sanno ee la soo dhaafey ahaa ardayga labaad ee ugu dhibco badan imtixaanka gobolka oo dhan. Dugsiga oo ah dugsiga aasaasiga ah ee ugu weyn Jowhar, waxaa dhigta 985 arday, 384 ay gabdho yihiin. Waxaana ka soo baxay Soomaali badan oo caan ah. Ardayda dugsiga ka soo baxdey waxaa ka mid ah Khadiija Maxamed Diiriye, oo ah gabar xubin ka ah Baarlamaanka oo hadda wasiiradda Wasaaradda Horumarinta Reer Miyiga ah. Dhismaha dugsiga Kulmis ayaa la burburiyey intii uu socdey dagaalka sokeeye laakiin waxaa dhowaan dayactirey, isaga oo loo sameeyey fayadhowr oo carruurta u habboon. Waxaa taageero ay UNICEF bixisey ku dayactirey urur aan dowli ahayn oo degaanka ka dhisan oo lagu magacaabo Farjano *Foundation*. Farjano *Foundation* waxa ay maareysaa dugsiga waxaana muddada aaney jirin maamul dhexe oo waxbarashada u qaabilsan, ay lacag dhiirigelin ah siineysey macallimiinta iyada oo taageero ka heleysa bulshada.

Cabikariin oo ah wiil maskax wanaagsan laakiin aamusan, ayaa sawirku u yahay hiwaayad. Aabbihii iyo macallimiinta fasalkiisa ayaa door muhiim ah ka cayaarey dhiirigelintiisa in uu sii horumariyo xirfadihiisa wax sawiridda. Cabdikariin ayaa sharxaya, “Aabbahey si weyn ayaa uu ii kaalmeeyaa macallimiinteyduna waa ay igu dhiirigeliyeen in aan sawiro waxyaabo ku saabsan dadka iyo waxyaabaha muujinaya nabadda Soomaaliya.” Waxaa uu sidoo kale sheegey in ay xirfadihiisa sawirka ay door ku leedahay xubinnimadiisa Naadiga Carruurta ee dugsiga oo qayb ka ah shabakad 135 Naadiyada Dugsiyada ah oo ku baahsan Soomaaliya oo dhan ayna taageerto UNICEF. Barnaamijka Naadiyada Carruurta ka dhexeeya ee Dugsiyada waxa uu carruurta dugsiyada siiyaa fursad ay ku kobciyaan xirfadaha waxbarashada ee ku habboon ee ka baxsan manhajka tooska ah iyada oo loo marayo waxqabadyo uu ilmuhu uu xuddun u yahay sida doodaha dhex mara dugsiyada, tartan riwaayado iyo farshaxan iyo sidoo kale kaqaybqaadashada ololayaasha diiradda saaraya arrimaha bulshada sida xuquuqda gabdhuhu u leeyihiin waxbarashada iyo in si firfircoon ay u ilaaliyaan deegaanka dugsigooda.

Cabdikariin oo soo bandhigaya xirfadda uu farshaxanka u leeyahay. © UNICEF Somalia/2009

Guushii uu Cabidkariin soo hooyey dhowaan ayaa saameyn wanaagsan ku reebtey dugsiga iyo bulshadaba. Maamulaha, macallimiinta iyo ardayduba waxa ay u diyaargaroobayaan in ay u dabaal-degaan guushiisa marka uu sanad-dugsiyeedka cusub uu bilowdo. Dugsigu waxa uu, isaga oo mas’uul ka ah Cabdikariin, heli doonaa abaal-marin ah qalab dugsi oo ay ka faa’iideysan doonaan dhammaan carruurta dugsiga.

UNICEF oo wax ka qabatey baahiyaha degdegga ah ee Carruurta Afgooye - *Ka yimid bogga 2aad*

“Marka aan arko carruurteyda oo dugsiga aadeysa, waxa aan ku farxaa in mustaqbalka ilmahayga aanu xumaan doonin; taasna waxa aan uga mahadcelinayaa UNICEF iyo ururka *Somali Community Concern*,” ayaa ay tiri Ruqiyo. Iyada oo ah hooyo qoyskeeda u shaqeysa, ayaa Ruqiyo waxa ay tiri in waxbarashada lacag la’aanta ahi ay yareyneyso culayska dhaqaale ee saaran maaddaama aaney kari lahayn in ay carruurta ka bixiso ujuurada dugsiga waxaana ay hadda tamarteeda isugu geyn kartaa quudintooda.

Maxamed Cabdi Budul waa aabbe laba carruur ah ay u dhigtaan Dugsiga Dadka Gudaha ku Barokacay ee Guutaale ee ku yaalla waddada Afgooye. Mudane Budul waxa uu xubin ka yahay hoggaamiyeyaasha bulshada Gudaha Ku Barokacay oo si weyn ugu qareemeeya dib u bilaabidda waxbarashada iyo in waxbarasho aasaasi ah oo lacag la’aan ah lagu helo xerada. Mudane Budul waxa uu yiri haddii aaney jiri lahayn waxbarasho lacag la’aan ah, carruurta ku jirta xerada waxa soo wajihi lahaa dhibaatooyin halis gelin lahaa noloshooda.

In kasta oo tobanaan kun oo carruur ku jirta da’dii dugsiyada oo jooga waddada Afgooye aaney weli ku jirin dugsi, dadaalka UNICEF ay ku ballaarineyso waxqabadka waxbarashada degdegga ah ayaa calaamad u ah rajada ay leeyihiin waalidiinta aaney weli carruurtoodu helin xuquuqdoodii waxbarasho.

Mashruuca da’yarta waxa uu raadinayaa habab cusub oo ay ku waajahdo dhallinyarada…

Maamulayaasha dugsiyada oo u adkeystey culaysada si ay u gaaraan madasha tababarka ee Bartamaha-Koonfurta Soomaaliya

Iyada oo culasyo weyni jireen, ayaa UNICEF ay dhowaan kulan tababar isugu keentey 274 maamule dugsi oo ka kala socday degmooyin iyo tuulooyin ku yaalla gobollada Jubbada Hoose iyo Jubbada Dhexe. Si ay u soo gaaraan Bu'aale oo ahayd madashii tababarka, maamulayaasha dugsiyada waxa ay ka soo gudbeen caqabadaha ay sababteen iskahorimaadyada ba'an ee hadda ka jira Bartamaha-Koonfurta Soomaaliya iyo nidaamka gaadiidka ee badanaaba liita – waddooyinka laamiga ah ayaa badanaaba ah kuwo aan jirin badi waddooyinkuna waa kuwo aad u burbursan oo dhiiqo badanna leh marka ay roobabku da'aan. Soo gaaridda Bu'aale waxa ay u baahneyd go'aan, geesinimo iyo adkeysi.

Si la isugu keeno macallimiintaasi, UNICEF waxa ay si joogto ah ugu noqoneysey taariikhaha iyo faahfaahinta kale iyada oo direysey teleefoonno, oo meelaha qaarna, ay ku wargaarsiineysey raadiyeyaasha HF-ka. Si ay u soo gaaraan madasha tababarka, qaar ka mid ah maamulayaasha dugsiyada waxa ay ka soo tageen dugsiyadoodii oo ay u soo safreen dhinaca Bu'aale laba todobaad ka hor tababarka.

Ibraahim Xaaji Xuseen iyo Fuma Ali Fuma waxa ay la soo kulmeen culaysyo badan ka hor intii aaney ugu dambeyntii soo gaarin Bu'aale. Labada maamule waxa ay ka soo safreen Kiyambooni, cirifka koonfureed ee Soomaaliya, iyo Jasiiradda Madhawa. Waxa ay soo jareen masaafo 500km ah, iyaga oo 260 km ee ugu horreeyey ku soo safrey doon ay ku soo gaareen Kismaayo, ka dibna waxa ay u soo gudbeen Bu'aale oo 240 km oo kale u sii jirta iyaga oo oo waddada soo marey oo soo isticmaaley gaadiid kasta oo ay heli kareen. Nasiib-darro ayaa ku dhacdey lugtii hore ee safarkooda ka dib markii doontii ay saarnaayeen ay dhexda ku hallowdey intii aysan soo gaarin Kismaayo. Waxa laba habeen ay ku qaateen badda iyaga oo marmar cunaya kalluun la shiiley oo cabbaya shaah Soomaali iyaga oo sugi la' inta doonta la dayactirayo.

Markii labada maamule ay soo gaareen Kismaayo oo ay ku soo baxeen waddadii Bu'aale, waxba kama oggeyn culayska kale ee sugayey. Dhibaatada waxaa sabab u ahaa roob weyn oo ka da'ayey degmada Bu'aale laba maalmood oo isku xiga oo ka horreeyey intii imaanshahooda. Biyihii fadhiyey dhulka ayaa waddadii ka dhigey dhoobo aan baabuur nooca uu doono ha ahaadee mari karin.

Xataa gaari-dameerrada ayaa ku soo dhiiranaan kari waayey dhiiqadaa. Labada macallin ee aan isdhiibidda aqoon ayaa go'aansaday in ay cagta maalaan iyaga oo muddo lix saacadood ah soo dhex jibaaxayey dhiiqo jilibka ugu joogta ilaa ay ka soo gaaraan Bu'aale. Mar kasta oo ay soo gaaraan goob uu teleefoonka gacantu shaqeynayo, shaqaalaha UNICEF ayaa la xiriirayey labada macallin si ay u hagaan ayna niyadda ugu dhisaan.

Ibraahim iyo Fuma waxa ay soo gaareen Bu'aale iyaga oo daallan laakiin waxa ay ku farxeen in ay la kulmeen saaxiibbo hore, oo qaarkood aaney sanado is arkin. "Marna ma lumin rajadii aan ka qabney in aan gaareyno halka aan ku soconno oo aan ka faa'iideysanno tababarka," ayuu yiri Ibraahim. "Fuma ayaa ii sheegey in uu aad u jecel yahay in uu u soo barto xirfado cusub oo uu ku maareeyo kuna maamulo dugsigiisa sida uga wanaagsan ee suurtagalka ah". Dhammaadkii tababarka, Fuma waxa uu sheegey in sida uu u arkayey maamulka dugsiga uu ballaartey. "Tababarka maamulayaasha dugsiyada ka hor, si buuxda uma garaneynin kaalinteyda maamule dugsi ahaan. Waxa aan jeclaan lahaa in aan ka qaybgalo tababaro kale oo kan la mid ah si aan dadka ula wadaago guulahayga iyo culaysyada jira. Waxaan hubaa in aan wax badan ka baran karo maamulayaasha saaxiibadey ah, gaar ahaan kuwa waayo-aragnimada dheer iyo tababarba u leh."

Faaduma Saalax, oo ahayd ka-qaybgale dumar ah oo ka socotey dugsiga Janna ee degmada Afmadow, ayaa sida Ibraahim iyo Fuma, safarka culays kala soo kulantey. Waxa ay soo martey 200 km oo waddo burbursan oo dhiiqo ah ka hor intii aaney soo gaarin Bu'aale. "Waa aan ka soo kabsaday daalkii jireed waxaana aan hadda si wanaagsan ugu kalsoonahay kartida aan u leeyahay maareynta dugsigeenna iyo carruurteenna," aya ay tiri Faadumo.

Naadiyada carruurta ayaa u horreeya kuwa iftiimiya arrimaha bulshada ee ugu muhiimsan

Barnaamijka naadiyada carruurta dugsiyada, oo ay taageerto UNICEF ayaa bilaabey in uu saameyn weyn uu ku yeesho fahamka iyo aragtida carruurta ee arrimaha bulshada ee muhiimka ah ee Soomaaliya oo ay ku jiraan maandooriyeyaasha iyo sinnaan la'aanta dheddig-laboodka.

Naadiyada ayaa hoggaaminayey abaabulka bulshada iyo u qareemeynta lagu dhiirigelinayo xuquuqda waxbarasho, ilaailinta iyo wanaagga carruurta ee Soomaaliya. Barnaamijkan oo carruurta iskufilka ah ay ku kala baranayaan xirfadaha nolosha iyada oo loo marayo dhacdooyinka dugsiga ku dhisan sida doodaha iyo tartamada dugsiyada dhex mara iyo sidoo kale waayeelka bulshada oo lagala munaaqashoodo arrimaha bulshada ee saameeya nolosha dhallinyarada iyo carruurta.

Nimco, oo ah gabar 13 jir ah, waxa ay ardayad ka tahay Dugisga Aasaasiga ah ee Biyodhacay ee ku yaalla gobolka Maroodijeex ee Somaliland. Bishii Sebtembar 2008, ayaa Nimco si iskeed ah xubin uga noqotey Naadi carruurta ka dhexeeya markii mid laga sameeyey dugsigeeda. Intii lagu gudajirey xafladdii xiritaanka dugsiga bishii Maajo ee sanadkan, in ka badan 900 oo carruur ah oo ka kala socdey Naadiyada carruurta dugsiyada ee Hargeysa ayaa isu yimid si ay ugu dabaaldegaan guulihii la gaarey sanadka Nimcina waxaa ay mataleysey dugsigeeda. Carruurta ayaa iyaga oo ku faraxsan ka heesayey in dadaalkoodii uu keeney dugsi-qoridda iyo dugsi ku negaashaha gabdhaha.

Eeg Bogga 7aad

In kasta oo ay xayirmeen haddana tababaryaashu marna kama rajo dhigin in ay gaarayaan madasha…

Dugsiyada Qur'aanka oo waxbarashada tooska ah u soo dhoweeyey carruurta

Tayada waxbarashada ee tuulada Karin ee gobolka Bari ee Waqooyi-bari Soomaaliya ('Puntland') ayaa lagu wanaajiyey iyada oo cunsurro ka mid ah waxbarashada tooska ah ee dugsiga tuulada la dhexgelinayo waxbarashada Qur'aanka. Marka laga soo tago baridda Qur'aanka, carruurta dugsiga dhigata waxaa loo dhigaa xisaab, Soomaali iyo Carabi waxaana ay heleen buug akhris iyo tababarka macallimiinta oo dheeri ah. dhismayaasha dugsiga ayaa la dayactirey lana wanaajiyey.

Carruur si wanaagsan u dhegeysaneysa macallinkooda bixinaya casharka waxbarashada la dhexgeliyey Qur'aanka oo ku jira mid ka mid ah fasallada dhowaan loo dhisay dugsiga Karin.© UNICEF Somalia/2009

Sanado badan, ayaa tuulada Karin aaney lahayn dugsi aasaasi ah, iyada oo saacado yar maalin kasta, ay carruurtu tegi jireen Dugsiga Qur'aanka ee sida yar u qalabeysan kaas oo ay waalidiintu ku khasbanaayeen in ay u diraan carruurtooda si ay u soo bartaan Qur'aanka.

Horey ayaa dugsi la'aanta tuulada Karin ay waalidiinta doonayey in ay carruurtooda waxbarasho u helaan ay ku khasbanaayeen in ay u guuraan magaalada Boosaaso oo ilaa 35km ka fog. U guuridda Boosaaso iyada oo la doonayo waxbarasho ayaa iyana culays kale ahayd, maaddaama noloshu ay qaali tahay halkaa. Waxbarashada Boosaaso si fudud kuma timaaddo, waa in ay carruurtu bixiyaan ujuurada dugsiga oo u dhaxaysa min saddex ilaa toban doollar bishii. Maaddaama ay waxbarashadu qaali tahay, ayaa qoysas badan aaney awood u lahayn in ay bixiyaan ujuurada ama ay ku khasbanaadaan in ay wax baraan hal ilmo oo keliya, kaas oo badanaaba ah wiil.

Saciid Maxamed oo qoyskiisa geeyey Boosaaso oo hadda ku soo noqdey Karin ayaa ah mid ka mid odayaasha Karin ee aqoonsan oo fahamsanna qiimaha waxbarashada. Dhallinyaranimadiisii waxa uu ahaa bad-mareen si aad ah ayuuna u safrey. Laakiin dugsi la'aanta tuulada Karin ayaa haseyeeshee waxa ay Saciid ku keentey in uu qoyskiisa oo shan carruur ah iyo hooyadood ka kooban u guuriyo magaalada Boosaaso isaga oo rajeynaya in uu halkaa ugu helo fursad waxbarasho, laakiin nolosha magaaladu ma noqon sidii uu rajeynayey waxaana ay ku rafaadeen deberidda noloshooda. Horraantii sanadkan, ayaa Saciid uu carruurtiisa kula soo noqdey tuulada Karin. Arrinta soo jiidateyna waxa ay ahayd dayactirka lagu sameeyey Dugsiga Qur'aanka ee Karin oo hadda bixinaya waxbarashada Qur'aanka ee la dhexgeliyey maaddooyinka kale.

Tuulada waxaa deggan 500 oo qoys, oo qoys kasta uu celcelis ahaan haysto afar carruur ah oo ku jira da'dii dugsiga. Badi dadka Karin waa beeraley yaryar, oo soo saara timir iyo khudaar oo ay u iibgeeyaan magaalada Boosaaso. Reer Karin waxa ay kaga fiican yihiin badi dadka reer Puntland oo ah reer guuraa xoolo dhaqato ah, waa iyaga xoolahooda u hela daaq cagaaran iyo biyo sanadka badidiisa. Haseyeeshee, beerashada noocan ahi waxa ay ku filan tahay oo keliya quudinta qoyskooda waxaana ay rafaad ku qabaan xataa helidda adeegyada bulshada ee aasaasiga ah. Iyaga oo taageero ka helaya UNICEF ayaa bulshada degaanka Karin ay hadda ku lug leeyihiin maareynta dugsiga iyada oo loo marayo Guddiga Waxbarashada ee Bulshada. Dugsigii Qur'aanka ee hore u burbursanaa ayaa dayactir ballaaran lagu sameeyey waxaana lagu biiriyey adeegyo biyo iyo fayodhowr. Qalabka (kuraas iyo miisas) cusub ayaa sidoo kale la siiyey. Dugsigu waxa uu sidoo kale leeyahay daarad dedan oo ay carruurtu ku ciyaari karaan.

Waxbarashada Qur'aanka ee la dhexgeliyey waxbarashada kale ayaa ah mid lagu kordhinayo in waxbarasho tayo leh ay helaan carruurta laga duudsiiyey xaqa ay u leeyihiin waxbarasho buuxda oo toos ah. Dalka Soomaaliya, dugsiyaga Qur'aanka waxaa laga helaa xataa meelaha aaney jirin dugsiyada caadiga ah. dugsiyadan waxa ay mararka qaar ku shaqeeyaan geedaha hoostooda ama dhismayaal aan caadi ahayn. Iyada oo la kaashanayo Wasaaradda Waxbarashada ee Puntland, oo taageero dhaqaalena laga heley DFID, ayaa UNICEF ay u taageereysey si tijaabo ah afar Dugsi Qur'aan oo la dhexgeliyey waxbarashada kale oo ku yaalla Gobolka Bari iyada oo maskaxda lagu hayo in mashruuca la ballaariyo sanadka soo socda iyada oo maaliyad kale laga helayo DFID iyo *Qatar Charity*. Dugsiyada la beegsaday waxaa lagu xushey rabitaanka maamulka dugsiga ee dhexgelinta waxbarashada tooska ah ay dhexgeliyaan manhajka uu hadda dugsigu leeyahay. Dugsiyadan la beegsaday ee soo jireenka ahaa, oo soo jiita 98 boqolkiiba dhammaan carruurta Soomaaliyeed taasna ay sabab u tahay iyada oo ah gudasho waajibka diiniga ah, ayaa ka duwanaa sidii laga aaminsanaa, waxaana ay ahaayeen kuwo soo dhoweeyey isbeddelka iyo in ay u babac-dhigeen culasyka ay leedahay in lala socdo jihada ay u socoto dabeysha waxbarashadu. Dugsiyada la xushey waxaa dhammaantood leh bulshada, taas oo xaqiijineysa sii jiritaankooda.

Maanta, carruurta Karin waxaa wax lagu baraa deegaan waxbarasho oo carruurta u wanaagsan. Macallimiinta waxa ay iska daayeen uleyntii curruurta iyaga oo ku beddeshey tallaabooyin edbineed oo ku dhisan jinsiga ilmaha oo ku fadhiya dhiirigelin. Intaa waxaa dheer, in xubnaha Guddiga Waxbarashada Bulshada ay dusha kala socdaan shaqo-qorista iyo imaanshaha shaqada ee macallimiinta, iyaga oo ka qayb qaata dayactirka joogtada ah ee dugsiga oo ku tirtirsiiya waalidiinta bulshadooda in ay carruurtooda ay dugsiga qoraan. Waalidiintan ayaa ah kuwo isbeddel wanaagsan u horkacaya bulshadooda. Dhammaan arrimahan ayaa waxa ay keeneen in ay kor u kacdo isqorista dugsiga ee wiilasha iyo gabdhaha, ku sii jiristooda dugsiga iyo waxbarashada dugsiyada la beegsadey.

Natiijo kale oo aan hore loogu sii xisaabtamin ee waxbarashada Qur'aanka ee la dhexgeliyey waxbarashada kale ee degaannada miyiga ah waa iyada oo yareysey geeddigii qoysaska miyiga ay ku soo qulqulayeen degaannada magaalada iyaga oo raadinaya waxbarasho toos ah iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah. Sida ay tuseyso waayo-aragnimada Saciid, waxaa la qiyaasayaa in qoysas kale ay ku soo noqon doonaan Karin si ay uga faa'iideystaan waxbarashada tayada leh ee hadda la helayo. Haddii habkaan cusub ee kor u qaadidda helidda waxbarashada aasaasiga ah iyada oo la dhexgelinayo Waxbarashada Qur'aanka ayaa aan shaki ku jirin in ay dib u soo nooleyneyso Karin, iyo sidoo kale bulshooyinka kale ee miyiga ee sii baaba'aya. Waalidiinta la mid ah Saciid, ee qiimeeya waxbarashada tayeysan, uma sii baahan doonaan in ay sal kiciyaan qoysaskooda iyaga oo degaannada magaalada u doonanaya waxbarasho aasaasi ah.

Dugsi Qur'aankii hore u burbursanaa ayaa la dayactirey…

Naadiyada carruurta ayaa u horreeya kuwa iftiimiya arrimaha bulshada ee ugu muhiimsan – *Ka yimid Bogga 5aad*

"Waa aan ku faraxsanahay in aan u qareemeeyo in kuwa igu filka ah aaney ka tegin dugsiga," ayaa ay tiri Nimco. "Waxa aan u sheegaa in waxbarashadu ay fure u tahay wax walba, iyada ayaana aan wax walba ku gaari karnaa!" Laakiin dhammaan saaxiibada Nimco lama wada qancin. Qaarkood waxa ay weli aaminsan yihiin in waxbarashada aasaasiga ahi ay u diyaarineyso guur ee aan wax kale u tareyn. Nimco ayaa laga yaabaa in aaney hawsheeda fari ka qodneyn, laakiin waa ay u caddahay waxa ay dooneyso mustaqbalka, "Waxa aan rabaa in waxbarashadeyda aan ka sare mariyo tan aasaasiga ah si aan khabiir ugu noqdo wixii i cajab geliya. Marka dambe, waxa aan jeclahay in aan u safro dibadda si aan u soo arko dunida ka baxsan Soomaaliya".

Xubno ka tirsan naadiga carruurta oo riwaayad ku soo bandhigaya dabaal-degga dhammaadka sanad-dugsiyeedka.© UNICEF Somalia/2009

Dabaaldegga dhammaadka sanad-dugsiyeedka waxaa furey Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada oo ka mahadceliyey hal-abuurka iyo kalsoonida carruurta ay ku muujiyeen riwaayadahooda.

Waxa uu sheegey in Wasaaradda Waxbarashadu ay ka go'an tahay in ay taageerto kor u qaadista dugsiyo u habboon carruurta. Waxa uu ammaaney barnaamijka Caruurta Ka Dhexeeya ee gacanta ka geystey waxqabadyada dugsiyada u dhexeeya iyo soo nooleynta dhaqanka hal-abuurka ee ilaa heer dugsi. Waxa uu ammaaney sida ay carruurta uga hadleen arrimaha bulshada ee saameynta ku leh naftooda. Mid ka mid ah kooxaha ayaa soo bandhigey riwaayad ka hadleysey dhibaatada cunista Qaadku oo ah caleen maanka doorisa oo Soomaaliya oo dhan laga isticmaalo, badibana ragga ay isticmaalaan. Heer qoys ahaan, ayaa cunistiisu waxa ay baabi'isaa lacagtii haddii kale lagu bixin lahaa ujuurada dugsiga.

Cunista qaadka ayaa sidoo kale si isa sii tareysa carruur badan oo Soomaaliyeed ugu keeneysa in ay ka tagaan dugsiga. Arrintan ayaa saameysey wiilasha iyo gabdhahaba; wiilasha ayaa ku bilaaba cunistiisa iyaga oo da'doodu aad u yar tahay iyada oo gabdhahana lagu khasbo in ay iibiyaan halkii ay dugsiga ka tegi lahaayeen.

Maaliyadda dhowaan lagu heley Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Dib u soo nooleynta iyo Horumarinta Waxbarashada, oo ah dadaal ay maalgelisey DFID, ayaa UNICEF ay awood ugu yeelatey in ay kor u qaaddo barnaamijka Carruurta ka dhexeeya ee Soomaaliland waxaana ay hadda taageertaa 45 naadi iyada oo uu qorshuhu yahay in la gaarsiiyo 60 marka uu bilaabanayo sanad-dugsiyeedka cusub. UNICEF waxa ay xiriir dhow kala leedahay Wasaaradda Waxbarashada ee Somaliland iyo Ururka Ardayda Somaliland, iyo ururka aan dowliga hayn ee degaanka ee u qareemeeya xuquuqda carruurta ee dhiirigeliya ka-qaybgalka carruurta iyo sinaanta dheddig-laboodka.

Culays kastaba ha jiree: Waxbarasho ayaa ay helayaan carruurta iyo dhallinyarada - *Ka yimid bogga 1aad*

The Spanish Committee iyo Sanduuqa Mareykanka ee UNICEF iyo qaaraan badan oo kan muddada gaaban ah, oo ay ku jiraan kuwa 12kii bilood ee la soo dhaafey laga heley dowladaha Jabaan, Spain, Talyaaniga, Sweden, Ireland iyo Denmark.

Tusaale ahaan, ballaarintii helidda waxbarashada tooska ah la ballaariyey iyada oo la taageerayo in manhajka tooska ah la dhexgeliyo Dugsiyada Qur'aanka ee Somaliland iyo Puntland, ayaa la arkey in ay keentey natiijooyin wanaagsan. Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya ayaa UNICEF oo ahayd hay'adda keliya ee bixisa buugta akhriska iyo qalabka dugsiyada ay ku biirisey taageero ay siiso tababarka macallimiinta si loo wanaajiyo tayada waxbarashada. Tababaradaan ayaa badanaaba lagu qabtaa xaalado aad u adag. Arrintan ayaa waxaa keeney dadaalka shaqaalaha Soomaalida ah ee UNICEF iyo dhabar-addeyga macallimiinta Soomaaliyeed ee dadaala culays kastaba ha haystee, in ay waxbarasho tayo leh siiyaan carruurta ay gacanta ku hayaan. Naadiyada carruurta ee dugsiyada ayaa wiilasha iyo gabdhahaba siiya fursad dhaafsiisan tan waxbarashada rasmiga ah ee dugsiga.

Dhallinyaro

Culaysyada badan ee Soomaaliya dal ahaan u haysta, ayaa xaalad adag geliya dhallinyarada. Adeegyada waxbarashada, macluumaadka iyo madadaalada ee dhallinyrada ayaa aan ahayn kuwo hadda wanaagsan; maamullka ayaa tabardaran oo xaaladaha noloshuna waa ay liitaan. Dhalinyarada hanaqaadka ah ee Soomaaliya ayaa la kacaakufaya sidii ay macno ugu sameyn lahayeen noloshooda iyaga oo rajeynaya in ay noolaadaan ayna dhex jibaaxaan culaysyo badan oo jira.

Waa arrintan tan mashruuca UNICEF ee Kobcinta iyo Ka-qaybgalka Dhalinta Hanaqaadka ah (ADAP) ee Soomaaliya uu u raadinayey habab hal-abuur ku dhisan oo ay u waajahdo dhallinyarada hanaqaadka ah ee dugsiyada. Waxa ay dooneysaa in ay siiso xirfado iyo aqoon aan ka caawineynin oo keliya in ay wax ka qabtaan culayska joogtada ah ee ka dhashey deegaanka Soomaaliya, laakiin sidoo kale siiya fursad ay ku galaan suuqa shaqada. Arrintan ayaa waxaa keeney taageero ay bixiyeen wada-hawlgalayaal kala duwan oo dhinaca horumarinta ah, oo ay ka mid tahay tii dhowaan laga heley Dowladda Japan. Iyada oo lagu xisaabtamo xaaladda hadda jirta, waxaa muhiim ah in la sii wado oo la sii maalgeliyo barnaamijyada dhallinta hanaqaadka ah ee Soomaaliya maaddaama ay dhallintu yihiin mustaqbalka dalka oo ay muhiim u yihiin xaqiijinta nabad iyo degganaansho. UNICEF waxa ay u go'day in la shaqeyso da'yarta waxaana ay sii wadi doontaa in ay casharro ka qaadato hawlihii hore ay u soo qabatey iyada oo ujeeddaduna tahay in la sii wanaajiyo barnaamijyada carruurta.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan barnaamijyadeena ama si aad u ogaato gacanta aad geysan karto fadlan la xiriir:

Rozanne Chorlton, Representative	**rchorlton@unicef.org**	**+ 254 722 514 569**
Denise Shepherd-Johnson, Chief of Communication	**dshepherdjohnson@unicef.org**	**+ 254 722 719 867**
Iman Morooka, Communication Officer,	**imorooka@unicef.org**	**+ 254 713 506 076**
Robert Kihara, Communication Officer	**rkihara@unicef.org**	**+ 254 722 206 883**